

U DIYAARGAROOWGA EEGISTA CALOOSHA

Magaca Bukaanka: _____

Dhakhtarka: _____

Taariikh aad mareyso Baaritaanka: _____ Nooca Baaritaanka: _____

Xilliga aad iminayso: _____

Goobta Baaritaanka:

- **CentraCare Health Plaza**- Xarunta Dheefshiidka: (320) 229-4933

Goobta Gaadiidka La Dhigto: Waxa aad dhigan kartaa goobta gaadiidka la dhigto ee **Woodlands** Xarunta Dheefshiidka waxa ay ku taalaa dabaqa 2aad.

Diiwaan gelin Fadlan imoow miiska xoghynta ee Xarunta Dheefshiidka si lagu diiwaangeliyo baaritaanka.

- **Isbitaalka St. Cloud Hospital**: (320) 229-4933

Goobta Gaadiidka La Dhigto: Goobta gaadiidka la dhigto ee **Koonfureed**.

Diiwaan gelin Ka soo gal dhismaha albaabka xiga **halka laga soo galo goobta gaadiidka la dhigto ee Koonfurta** soona raac **wiishka dusha sare ee Koonfurta**. Soo raac wiishka oo dooro dabaqa **2aad** oo tag miiska xogheynta Xarunta Wadnaha iyo Murqaha.

Waxaa ku soo wacaya kalkaaliye caafimaad oo qaabilsan diiwaangelinta 5 ilaa 7 cisho ka hor baaritaanka. Waxa ay ku weydiinayaan su'aalo kaa caawinaya u diyaargarowga baaritaanka, waxa ay kaala hadlayaan caafimaadkaaga; waxxayna kaa caawinayaan daawada aad qaadato ka hor iyo ka dib baaritaanka. Haddii aad qabto **wax** su'aal ah oo ku saabsan tilmaamaha, fadlan soo wac **(320) 229-4974** Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxeysa 8da aroornimo ilaa 4ta galabnimo. Waxa kale oo aad naga soo wici kartaa **1-844-795-1734**. Haddii aad rabto inaad bedesho balanta, fadlan soo wac **(320) 229-4933**.

Baaritaanka ka hor

- La xiriir veymiskaaga oo kala hadal inuu bixinayo kharashka baaritaanka. Telefoonkopoda waxa uu ku yaalaa dhinaca dambe ee kaarka.

U diyaargarowga eegista caloosha

- Qof weyn oo mas'uul ah oo da'diisu tahay **18 jir ama ka weyn** waa inuu ku wehliya balantan Waxaanu kugula talineynaa in lagu wado gaariga baaritaanka ka dib. Haddii aad doorato inaad ka tagto goobta baaritaanka, laakiin aad joogeyso dhismaha, waxa aad codsan kartaa in lagu siiyo bejar lagaa soo waco.
- **Laguuma ogola** inaad gaari kaxaeyso oo aad guriga ku aado **Laguuma ogola** inaad taksi ama bas raacdo ama aad kaligaa ka tagto goobta baaritaanka.
- Taksi waad u qadan kartaa guriga laakiin waa in **qof weyn oo mas'uul** ah kula socdaa.
- Haddii aad heysan qof mas'uul ah oo gaariga kuu wada (qoysk ama saaxiibadaa) baaritaankaaga lama sameyn karo dib ayaana loo dhigayaa.

- Waxaanu kuugu adkeyneynaa in qof kula joogo 24ka saac baaritaanka dib waayo waxaa suurogal in daawada lagu siiyo saameyn ku yeelato jirkaaga, xuxuustaada iyo awooda aad si fiican ugu fikirto.
- Shaqada **kuma** noqon kartid gaari iyo makiinadna kuma shaqeyn kartid maalinta lagugu sameeyo baaritaanka. Ha cabin khamri wax qoraal ahna ha sixiixsan ka dib marka lagu suuxiyo.
- Inta aadan ka tagin isbitaalka, xaaladaadu si caadi ah in ay ku soo noqoto ayey ku dhawaaneysaa.

Daawada

- Kalkaaliye caafimaad ayaa ku soo wacaya oo kaala hadlaya daawada aad qaadato iyada oo kuu sheegeysa daawada aad qaadaneysa seexashada ka hor.
- Waxaa suurogal in daawooyinka aad qaadato qaarkood aad joojiso ama wax laga bedelo ka hor inta aan kaameerada lagu eegin caloosha. Waa in aad wacdaa **dhakharka kuu qoray daawada** ugu yaraan 2 todobaad ka hor inta aan kaaameero lagu eegin qeybta hoose ee caloosha.
 - Daawooyinka dhiigga jiliciya ama ka hortagga xinjiroowga. Fadlan wac dhakhtarka la socda daawooyinka aad qaadato. Waxaa suurogal ah in inta aad ka qaadato wax laga bedelo marka tuubada lagu eegayo qeybta hoose ee caloosha.
 - Insuliinta iyo kiniinka macaanka (sokoroowga) Fadlan wac dhakhtarka la socda daawooyinka aad qaadato. Waxaa laga yaabaa in wax laga bedelo inta aad ka qaadato insuliinta maadaama cuntada aad cunto la yareynayo si caloosha loo diyaariyo. **fadlan soo qaado daawada aad u qaadato macaanta ama sokorta maalinta baaritaanka lagugu sameynayo.**
 - Waxa aad qaadam kartaa asbiriin adiga oo biyo ku cabaya.
 - Soo qad dhamaan daawada lagu neefasdo ee aad isticmaasho maalinta baaritaanka
 - Soo qaado C-PAP maalinta baaritaanka haddii aad ku isticmaasho guriga. (Bukaanka baaritaanka loogu smeynayo St. Cloud oo kaliya).
 - Soo qaad dhamaan qalabka ogasjiinta lagu qaato ee guriga aad ku isticmaasho maalinta baaritaanka.

Maalin ka hor maainta la eegayo mindhicirka

- Xusuusnoow inaad waxba cunin ama cabin wixii ka dambeeya saqda dhex ka dib **marka laga eebo biyo cad.**
- Waa in calooshaadu marnaataa si dhakhtarkaagu u arki karo mindhicirada.

Maalinta Tuubada Afka Lagaa Gelinayo

- **Xusuusnoow inaad waxba cunin ama caitaan marka laga reebo biyo cad.**
- Waxa aad cabi kartaa biyo cad kaliya ilaa afar saacadood balanta aad ku tageyso isbitaalka. Fadlan cabitaanka biyaha ku xadid sideed wiqayadood.
- Ha isticmaalin barafuun ama waxyaabaha la isku carfiyo.
- Ha soo xiran waxyaabaha la isku qurxiyo. Alaabada qaaliga ah ee qiime badan ku fadhiya aqalka uga soo tag.
- Haddii aad xirato indhogashi, soo qaado galka lagu rido.
- Si caadi ah u soo labiso.

Fariin/Tilmaan bixin kale: _____
